



Waxaan u baahan nahay inaan isticmaalno macluumaad shakhsi ahaaneed oo adiga kugu saabsan si aan u awoodno inaan adeegyo kuugu deeqno. Macluumaadkaas sidan ayaan u ilaalinaa.

Markaan ku waydiisanno macluumaad shakhsi ahaaneed, waxaan ku ballan-qaadaynaa:

- inaan xaqiijinno inaad ogaato sababta aan ugu baahan nahay;
- inaan ku waydiisanno uun waxaan u bahaan nahay oo keliya, iyo in aanan kaa qaadan macluumaad xad dhaaf ah ama aan loo baahnayn;
- inaan ilaalinno oonan xaqiijinno in uusan helin qof aan xaq u lahayn amaba u baahnayn;
- inaan u tabinno ururo kale marka sharcigu uu noo fasaxayo oo keliya;
- inaan xaqiijinno in aanan sii haynin waqti dhaafsan waqtiga loo bahan yahay; iyo
- in aanan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed u diyaarin adeegsi ee ganacsi annagoon haysan rukhsaddaada.

Dhinacaagana, waxaan kaa codsanaynaa inaad:

- na siiso macluumaad sax ah; iyo
- inaad noo sheegto markay suuragasho haddii ay wax is-beddelaan, sida cinwaan cusub.

Tani waxay noo fasaxaysaa inaan hayno macluumaadkaagii ugu dambeeyey ee lugu kalsoonaan karo.

Waxaad heli kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan:

- sida aad u ogaan kartid waxa macluumaad ah ee aan kaa hayno iyo sida aad noo waydiisan karto inaan saxno wixii qalad ah;
- heshiisyada aan la leenahay ururo kale ee la xiriira wadaagidda macluumaadka;
- xaaladaha sababeyn kara inaan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed tabinno annagoon kuu sheegin, tusaale ahaan, si aan uga hor-tagno una ogaanno dambi ama si aan u soo saarno tiro-koob magacyo la';
- amarrada aan siinnay shaqalaheena ee la xiriira habka ay tahay inay u soo uruuriyaan, u isticmaalaan una tir-tiraan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed;
- habkaan u fiirinno in macluumaadka aan haynaa ay sax tahay oo ayna tahay tii ugu dambeeysey; iyo
- sida loo dacwoodo.

SI AAD U HESHO WAR DHEERAAD AH, FADLAN LA XIRIIR:

Markaan ku weydiisanno macluumaad, sida sharcigu u dhigayo ayaan samayn doonnaa, kaasoo u ka mid yahay Sharciga gaarka ah ee 1998 ee la xiriira Ilaalinta Macluumaadka. Si aad u hesho talo-siin madaxbannaan oo ku saabsan arrimaha la xiriira ilaalinta macluumaadka, kali ahaanshada iyo wadaagga macluumaadka, waxaad la xiriiri kartaa Information Commissioner (Maamulaha Macluumaadka) oo aad kala xiriiri kartid: Wycliffe House, Water Lane, Wilmslow, Cheshire, SK9 5AF. Telefoon: 01625 545745 Faks: 01625 524510 E-mailka: mail@dataprotection.gov.uk Shabakada: www.informationcommissioner.gov.uk